# Ogaysiis Ku aaddan Xuquuqdaada

Waxaa si sharaf leh laguugu wargelinayaa xuquuqdaada aad ku leedahay sharciga Washington.

**Qiimaha Ugu Yar:**

Marka loo eego sharciga Washington, darawaliinta waxaay xaq uu leeyihiin in la siiyo qiimo lacageed oo loo damaannad qaaday oo lagu siin doono daqiiqad kasta, mayl kasta iyo safar kasta oo ay u baxaan.

Marka laga hadlaayo safarrada daraawalka uga soo dhaco gudaha Magaalada Seattle, daraawallada waxaay qaadan doonaan ugu badnaan $6.12/safarkiiba AMABA $0.70/daqiiqaddiiba iyo $1.63/maylkiiba, iyadoo aan la eegeynin in safarka ku soo dhamaaday gudaha Magaalada iyo in kale.

Marka laga hadlaayo safarrada daraawalka uga soo dhaco dibedda Magaalada Seattle balse ku soo dhamaado xeyndaabka gudaha Magaalada, qiimaha kor lagu soo xusay ayaa la adeegsan doonaa qaybaha safarka ee uu daraawalka ku safray gudaha xeyndaabka Magaalada.

Marka laga hadlaayo dhammaan safarrada kale ee daraawalka uga soo dhaco Washington, daraawaliinta waxaay qaadan doonaan ugu badnaan $3.55/safarkiiba AMA $0.40/daqiiqadiiba iyo $1.38/maylkiiba, iyadoo aan la eegeynin in uu xadidaayo iyo in kale safarka ku soo dhamaaday gudaha Washington.

Marka laga hadlaayo safarrada daraawalka uga soo dhaco dibedda Washington, qiimaha kor lagu soo xusay ee la tixraacay ayaa loo adeegsan doonaa qaybaha safarka ee uu daraawalka ku safray gudaha gobolka.

**Ilaalinta lacagta garashada (Tip):** Darawallada waxaay sii heli doonaan dhammaan wixi lacag garasho ah. Lyft ma u adeegsan doonto lacagahaasi garashada si loo buuxiyo shuruudaha jaangoynta qiimaha ugu yar.

**Diidmada safarrada:** Daraawaliinta waxaay heli doonaan qiimaha ugu yar ee safar kaste ee ay diideen rakaabka amaba shirkadda Lyft, marka laga reebo diidmada ka timid hab-dhaqanka daraawalka.

**Lacagaha laga jaro darawalka:** Daraawalliinta waa inay aqbalaan iyadoo loo maraayo qaab qoraaleed lacagaha ay shirkadda ka jaraneyso (marka laga reebo marka ay taasi lid ku tahay sharciga ama amar maxkamadeed).

**Ogaysiis**: Lyft waxaay daraawaliinta la wadaagi doontaa macluumaadka ku saabsan lacagaha safar-kasta si usbuucle ah.

**Fasaxa Xanuun Dartii ee Aan Lacagta La Jareyn**: Daraawallada waxaay xaq uu leeyihiin fasax markaay xanuunsadaan iyagoo aanan lacag laga jareyn, waxaayna ku xiran tahay isu geynta xaq-u-lahaanshaha fasaxahaaga. Daraawallada waxaay heli doonaan hal sac oo ah fasaxa la siiyo xilliga ay xanuunsadaan iyagoo aan laga jaraneynin wax lacag ah mar kaste oo ay 40 sacadood ka shaqeeyaan qaadista rakaabka ku safra gudaha Washington. Daraawalliinta waa in ay isku geygeyn helaan ugu yaraan 4 sacadood si ay uu qaatan fasaxa xilliga ay xanuunsan yihiin iyadoo aan wax lacag ah aan laga jaraneynin. Daraawalliinta waxaay ku beddelan doonaan fasaxa ay qaatan xilliga ay xanuunsan yihiin qiimaha lacageed ee ay celcelis ahaan qaatan sacadiiba (taas oo loo xisaabiyo iyadoo lacagaha aad sameysay loo qeybinaayo sacadaha aad shaqeysay) 12-kii bilood ee ugu dambeeyay.

Daraawalliinta ayaa waxaa laga yaabaa inay u adeegsadan fasaxa ay qaatan xilliga ay xanuunsan yihiin sababaha soo socda awgood:

- Xanuunada jismiga amaba dhanka dhimirka ah, dhaawac, amaba marxalad kale oo caafimaad, oo ay qayb ka tahay mida uu baahan in qofka la baaro, la daryeel, ama la daaweeyo.
- In uu daryeel siinaayo xubin kamid ah qoyskiisa ee qaba xanuunnada jismiyanka ah amaba dhanka dhimirka ah, dhaawac, amaba marxalad kale oo caafimaad, oo ay qayb ka tahay in qofkaasi katirsan qoyska uu u baahdo in laga baaro xanuunka, la daryeelo, ama la daaweeyo.
- Daryeelka caafimaad ee ka hortagga ah ee aad adiga qaadaneyso amaba aad siineyso xubin katirsan qoyskaaga oo uu baahan daryeelka caafimaad ee ka hortagga ah.
- Sababaha la xiriira tacaddiga qoyska amaba dembiyada la xiriira nacaybka ee lagula kaco adiga amaba qof katirsan qoyskaaga.
- Sababaha la xiriira tacaddiga galmo amaba in adiga amaba qof katirsan qoyskaaga la handado
- Haddii la xiray dugsiga uu dhigto canugaaga amaba goobta ilmaha lagu xanaaneeyo iyadoo ay sabab u tahay amar uu soo saaray sarkaal dowladda katirsan taas oo la xiriirta sababo caafimaad.

Confidential - Not for Public Consumption or Distribution

- Xilliga lagaa xiray aaladda aad ku shaqeysato amaba marka ay dhacaan waxyaabaha kale ee ka hor istaagaaya in aad ku shaqeysato isla aaladdaas, marka laga soo reebo kuwo qaar.
- U diyaargaroowga amaba ka qaybgalka kalfadhi maxkamadeed amaba mid la xiriira arrimaha socdaalka ee ku khuseeya adiga amaba xubin katirsan qoyskaaga.
- Sababaha kale ee dheeraadka ah ee uu ogol yahay sharciga.

**Magdhowga qofka Shaqaalaha ah**: Daraawalliinta waxaay ka akhrisan karaan oo ka daabacan karaan warqadaha boodhadhka halkaan si ay uu tixraacdan marka ay uu baahdan. Iyadoo ay qayb ka tahay barnaamijka magdhowga shaqaalaha, qayb yar ee boqolkiiba lacagaha aad ka sameysay dhammaan safarrada aad gashay ee aad rakaabka ka qaadday amaba aad geysay Washington ayaa laga reeban doonaa iyadoo lagu bixin doono nidaamka aaladda aad ku shaqeyso, si lamid ah shaqaalaha kale ee ka shaqeeya Washington ee haysta caymis.

**Aar gudasho:** Daraawalinta waxaay xaq uu leeyihiin in laga difaaco wax kaste oo aar gudasho ah oo ka dhasha markii ay si niyad wanaag ah ay ugu dhaqmaan xuquuqda ay leeyihiin ee lagu qeexay ogaysiiskan, taas oo ay qayb ka tahay, balse aan ku koobnayn, in laga qaado tallaabo aar gudasho ah iyadoo ay sabab u tahay inay si sharciyan ah uu isticmaalan fasaxa la siiyo xilliga ay xanuunsadan iyo sidoo kale xuquuqda kale ee ay leeyihiin ee la xiriirta fasaxa la siiyo xilliga ay xanuunsan yihiin iyadoo aan laga jaraneynin lacagahooda.

**Xuquuqda Qaadista Tallaabo Sharciga:** Darawaliinta waxaay xaq uu leeyihiin inay ku dhaqaaqan oo ay qaadan tallaabo dhanka sharciga ah ama cabasho uu gudbiyaan Waaxda Shaqada & Shirkadaha haddii TNC ku guuldareysato inay bixiyaan qiimaha ay horay uu dammaanad qaadeen ama ay kula kacaan falal aar gudasho ah.

Confidential - Not for Public Consumption or Distribution